

## Maxaan hore u soo qaataa – si canshuurta la iigu xereeyo?

Waxaa muhiim ah inaad hore u soo qaadatid, waraaqaha iyo caddeymaha ey ku qoran yihiin dakhliga ku soo galey, iyo rasiidyada lagaaga dhimi karo canshuurta, sidoo kale hore u soo qaado caddeynta kirada aad bixisey sanadkaan ama canshuurta aad gurigaaga ka bixisey.

Uma baahnid inaad soo wada qaadatid waxyaalaha hoos ku xusan dhammaantood, gaar ahaan hadii eysan ku khuseynin. Liiska hoose waxaa ku xusan - inta badan waxa la iska rabo inaad soo qaadatid.

### Waxaa laga rabaa:

- Aqoonsi sawir leh (si lagu garto)
- Social Security-gaaga iyo kan qof walba oo aad ku xereysaneyso canshuurta, ama hadii aad heysato ITIN.
- Taariikhaha dhalashada dhamaan dadka kugula qoran canshuurta
- Canshuur celintii sanadkii la soo dhaafey
- Akoon lanbarka bangigaaga
- Caddeymaha dakhliga ku soo galey sida:
  - Mushaharkaaga (W-2 iyo 1099-MISC)
  - Faa'iidada ama dulsaarka (1099-INT)
  - Saamigaaga (Dividend Form 1099-DIV)
  - Lacagta howl-gabka (Form 1099-R)
  - Hadaad iska gaddey Stocks (1099-B)
  - Hadaad Khamaar ku guuleysatey (W-2G)
  - Lacagta Unemployment-ga (1099-G)
  - Lacagta Social Security-ga (Form SSA)
  - Caddeymaha dakhliga kale ee kaa soo galey barnaamijyada taageerada qoyska sida: Supplemental Security Income (SSI), Minnesota Family Investment Program (MFIP), Minnesota Supplemental Aid (MSA), General Assistance (GA) iyo magdhowga shaqaalaha ama, wlm.

### Soo qaado hadii aad heysato:

- Lacagta aad waxbarashada koleejka ama jaamacada ku bixisey (Form 1098-T)
- Dulsaarka deynta waxbarashada (1098-E)
- Lacagaha howl-gabka (IRA contributions)
- Rasiidyada waxyaabaha aad sheeganeyso si canshuurta lagaaga yareeyo sida:
  - Kharashka caafimaadka ee aad jeebkaaga ka bixisey
  - Sadaqooyinka iyo deeqaha aad bixisey
  - Cusbooneysiinta taarikada gaariga
  - Canshuurta guriga iyo dulsaarka morgejka
  - Lacagta Canshuurta Laguugu diyaariyey
- Kharashka aad ku bixisey heynta ilmaha (Daycare) oo wata magaca goobta, social securityga qofka lacagta la siisey ama lanbarka canshuurta ee ganacsiga.
- Rasiidka kharashaadka aad ku bixisey waxbarashada caruurtaada dhigta (K-12) sida kharashka:
  - Barnaamijyada waxbarashada (Software)
  - Kharashka iskoolaadka khaaska ah
  - Lacagtaad ku bixisey meeriska (Tutoring)
  - Buugaagta daabacan iyo qalabka iskoolka
  - Kirada ama qiimaha qalab waxbarasho sida koonbiyuutarka.
  - Kharashka aad ku bixisey (summer camp)
  - Lacagta barashada gaari wadida
  - Qalabka Iskoolka sida buugaagta, qalmaanta kaalkuleytarka iyo, wlm
- Kharashka kaaga baxay ganacsigaaga – ilaa \$25,000 (hadii aad khasaare ku jirtid, kuma caawin karno)
- Caddeynta sheegeysa inaad sanadka oo dhan ceymiska caafimaadka heysatey (1095-A, B ama C)
- Lacagaha ka soo noqda hantida sida:
  - Kireystaha: lacagta kirada aad bixisey oo aad ka soo qaadaneysa qofka guriga iska leh (CRP).
  - Milkiilaha: lacagta aad ku bixisey canshuurta gurigaaga (Statement of Property Tax Payable).
  - Guri Rarma (Mobile Home): Kirada booska gurigu yaallo (CRP) iyo canshuurta guriga (Statement of Property Tax Payable)

